# Dhibbanayaasha Xadgudubka Qoyska Ka Dhex dhaca: Codsashada caymiska caafimaadka

Miyaad la nooshahay ama ka carareysaa xadgudubka qoyska ka dhex dhaca oo ma ku dhib qabtaa codsashada daryeel caafimaad? Waxaad ka codsan kartaa caymiska daryeelka caafimaadka waqti kasta *Washington Healthplanfinder*, xitaa xilliga ka baxsan muddada isqoritaanka furan.

## Sideen u codsadaa caymis caafimaad iyadoo la adeegsanayo *Washington Healthplanfinder*?

- Online-ka: Booqo barta *Washington Healthplanfinder* oo ah **wahealthplanfinder.org**
- Telefoonka: Ka Wac Taageerada Macmiilka 1-855-923-4633 (TTY:1855-627-9604)
  - Taageero luuqadeed ayaa lagu heli karaa in ka badan 200 luuqadood
- Warqad: **hca.wa.gov/health-care-application**
- Shakhsi Ahaan: Kheyraadka degaanka, iyadoo aan lagaa qaadin kharash dheeraad ah, ayaa waxay kaa caawin karaan in aad codsato caymis caafimaad.
  - **Hagaha *Washington Healthplanfinder* ama Caawiyaha Qabiilka**

## Goormee caymiska codsan karaa anigoo adeegsanaya *Washington Healthplanfinder*?

Haddii aad la nooshahay ama aad ka carareyso xadgudubyada qoyska ka dhex dhaca, waxaad codsan kartaa caymis caafimaad waqti kasta sannadka oo dhan. Ma jiraan xaddidaadyo waqti, sida inta lagu guda jiro isqoritaanka furan.

## Maxaa dhacaya haddii aan hadda kula qoranahay caymiska caafimaadka loo marayo *Washington Healthplanfinder* qofka i dhibaateeyay oo aanna doonayo in aan codsado caymis aniga ii gaar ah?

Si aad codsi kaligaaga u buuxsato, waxaad u baahan tahay in lagaa saaro codsiga aad la wadaagto qofka xadgudubka kuu geystay. Si aad tani u sameyso, wac mid ka mid ah xarumaha adeegga macmiilka ee hoos ku qoran, iyadoo caymiska lagu saleynayo.

**Caymiska Washington Apple Health (Medicaid):**
Kala xiriir wakiilka Apple Health halkan **hca.wa.gov/assets/free-or-low-cost/area_representatives.pdf**

**Qorsheyaasha Qualified Health:**

- *Washington Healthplanfinder:* 1-855-923-4633

***Taxaddar:*** Qofka ku dhibaateeyay wuxuu heli doonnaa ogeysiis email ama warqad ah oo sheegaya in isbeddel lagu sameeyay codsiga la wadaago. Ogeysiisyada ayaa la soo diri doonnaa isla maalinta ku xigta.

## Miyaan isku qori karaa caymis caafimaad gaar ka ah kan lammaanaheyga ee ah qofka i dhibaateeyay?

Haa. Haddii uu guur idin ka dhaxeeyo, aad kala tagteen, ama aad iskaashi guri diiwaangashan kula jirto qofka ku dhibaateeyay, waxaad isku qori kartaa caymis caafimaad gaar ah. Codsiga *Washington Healthplanfinder*, marka lagu weyddiiyo in aad bixiso xaaladda canshuurt xareyntaada, muuji in aad tahay “Qof Kaligiisa ah oo Canshuuraha Xareysta.” Tilmaamaha federaalka ayaa sheegaya in aad tani sameyn karto adigoo aan ka cabsan ciqaabta hay'adda IRS.

## Macluumaadka aan ku bixiyo codsigeyga cusub miyaa lala wadaagayaa qofka i dhibaateeyay?

Maya. Codsigaaga waa mid sir ah, macluumaadkaagana lala ma wadaagi doono cid saddexaad kasta, adiga oo aan oggolaansho qoraal ah lagaa hayn.

## Maxaa dhacaya haddii aanan bixin karin lambarkeyga Damaannada Bulshada, xadgudubka qoyska ka dhex dhaca awgiis?

- Apple Health waxaa lagaaga cafin karaa shuruuddan.
- Qorshaha Qualified Health, waxaa lagu siin karaa 95 maalmood oo xaq-u-yeelasho shuruud ku xiran ah si aad xaqiijin u bixiso. Haddii aad muujin karto dadaal niyad wanaag ku dhisan oo aad xaqiijin ku bixin karto, waxaa laga yaabaa in waqti dheeri ah lagu siiyo.

## Maxaa dhacaya haddii aanan heli karin caddeynta dhalasho ama xaalad socdaal?

Haddii aad haysato Lambarka Damaannada Bulshada, *Washington Healthplanfinder* waxay ku weyddiin doontaa in aad bixiso sababtoo ah waxay elektaroonig ahaan u xaqiijin kartaa xaq-u-yeelashada. Haddii aad haysato, waxaad weli heli kartaa caymiska daryeelka caafimaadka waxaanna goor dambe lagu weyddiin doonaa in aad bixiso dokumenti la aqbali karo oo aad ku xaqiijin karto aqoonsigaaga. **Eeg liiska dhammeystiran ee dokumentiyada aqoonsiga ee la aqbali karo.**

## Ma ikhtiyaaro ayaan leeyahay haddii aan sharci la’aan ahay ama aanan buuxin shuruudaha socdaalka?

Qof walboo ku noolka gobolka Washington ayaa wuxuu fursad u haystaa in uu helo caymiska caafimaadka iyo ilkaha oo loo marayo *Washington Healthplanfinder,*, iyadoon la eegayn xaaladda socdaalka.

### Apple Health

Haddii ay da'daadu ka weyn tahay 19 sano jir, waxaad xaq u yeellan kartaa Apple Health Expansion (laga bilaabo Luulyo 2024). Wax badan ka ogow **hca.wa.gov/apple-health-expansion.**

Carruurta iyo haweenka uurka lah waxay xaq u yeellan karaan caymiska Apple Health iyadoo aan la eegayn xaaladda socdaalkooda. Eeg shuruudaha xaq-u-yeelashada ee **carruurta**, **haweenka uurka leh**, iyo **Caymiska Uurka-Kadib** si aad u aragto haddii aad xaq u leedahay. Haddii aadan xaq u yeellan caymiska Apple Health, waxaad xaq u yeellan kartaa caymiska **Qorsheynta Qoyska oo Keliya** kaas oo caymiya hababka kala duwan ee ka hortagga uurka iyo adeegyada kale ee qorsheynta qoyska.

### Ikhitiyaarada Qualified Health Plans iyo Cascade Care Savings ee loogu talagalay muhaajiriinta

Waxaad iibsan kartaa qorshayaasha qualified health iyo dental (ilkaha). Ogow wax badan oo ku saabsan **daryeelka caafimaadka muhaajirka iyo ikhtiyaarada kale ee kharash dhaqaaleynta**. Dhibbanayaasha xadgudubka qoyska ka dhexdhaca waxay xaq u leeyihiin **muddada isqoritaanka gaarka ah** waxayna codsan karaan caymiska ka baxsan muddada isqoritaanka furan.

## Sideen u codsadaa caymis caafimaad, haddii lambarkeyga ama lambarrada Damaannada Bulshada ee carruurteyda iyo/ama magacyada ay isbeddelaan?

Haddii lambarka Damaannada Bulshada iyo/ama magaca aan la xaqiijin karin iyadoo la adeegsanayo *Washington Healthplanfinder*, waxaa lagaa codsan doonnaa in aad dokumentiyo dheeraad ah keento.

## Waxaan ka qaybgalaa Barnaamijka Sir Ahaanta Cinwaanka (ACP). Ma codsan kartaa caymis caafimaad anigoo adeegsanaya *Washington Healthplanfinder*?

Haa. U Geli lambarkaaga Sanduuqa Boostada (PO Box) ee ACP sida “Cinwaanka Gurigaaga.” Ka-dib marka aad cinwaanka ACP geliso, sanduuq ayaa soo boodaya oo ku weyddiinaya "Lambarkaaga ACP" – geli PMB-gaaga ama Lambarkaaga Aqoonsiga ee uu bixiyay Barnaamijka Sir Ahaanta Cinwaanka. Sanduuq kale ayaa soo boodi doona marka aan electaroonig ah (e-Sign) ahaan u saxiixdo codsiga oo ku weyddiinaya sib koodhka halka aad daryeelka caafimaadka ka raadsanayso.

***Muhiim ah:*** Haddii aad ka qaybgasho Barnaamijka Sir Ahaanta Cinwaanka (ACP) oo laguu oggolaado Apple Health, waxaa si toos ah laguugu qorayaa in aad adeegyada ka hesho Degmada Thurston.

Haddii tani aysan kugu habboonayn, fadlan la xiriir bixiyaha daryeelkaaga la maareeyo kowda bisha markaad isku qorto. Waxaad awoodi doontaa in aad doorato Bixiyaha Daryeelka Aasaasiga ah (PCP) ee degaanka aad deggan tahay. Su'aalaha waxaa Maamulka Daryeelka Caafimaadka loogu hagaajin karaa lambarka 1-800-562-3022 (khadka dheeraadka ah 16131)